

## Waa maxay sababta kaadida loo hubiyo xilliga xaamilanimada

Kaadidaadu waxay bixinaysaa calaamado sal u ah caafimaadka adiga iyo canuggaaga.

Waxaa si joogto ah looga baadhi doonaa xilliga xaamilanimada waxyaabahaan:

- **Borotiinta** - calaamadda lagu ogaado cudurka pre-eclampsia
- **Guluukoosta** (somkorta) - calaamadda macquulka ah ee kaadi macaannada taas oo soo bixi karta xilliga ugu horreeya ee uur qofka dumarka ahi qaaddo
- **Bakteeriyada** - Calaamad muujinaysa jeermis

Warbixintaani waxay si weyn ugu saabsan tahay baadhitaannada laga sameynayo kaadida ee cudurka pre-eclampsia (kaas oo loogu yeedhi jiray toxemia). Calaamadaha iyo waxyaabaha lagu garto cudurka pre-eclampsia wuxuu soo baxaa niska dhexe ee xaamilanimada. Dhiig karka sare waa calaamadda kale.

Dumarka qaba cudurka loo yaqaan pre-eclampsia sida caadiga ah waxay dareemaan caafimaad qab. Taasina waa sababta baadhitaanka joogtada ah loogu sameeyo kaadida iyo dhiig karku ay muhiim u yihiin.

### Sida tijaabooyinku u shaqeeyaan

Umulisadaada ama dhakhtarkaagu wuxuu dhex dhigayaa dhuub waraaq ah (dipstick) kaadida tijaabada ah ee maalintaas. Tijaabada baadhitaan waxay muujinaysaa haddii borotiin laga helay isla markaana bixinaysaa calaamad muujinaysa inta ay le'eg tahay.

Qadarka yar ee borotiinta ah ayaa lagu dhigayaa faahfaahinta galkaaga sidii "raad raac". Tanina maahan wax laga walwalo. Wixii kabadan raad raaca borotiin ah waxaa loo tixraacaa sidii hal ama kabadan + calaamado ah, ilaa afar ugu badnaan.

### Maxaa dhacaya haddii borotiin la helo?

Haddii aad qabtid hal + ama kabadan oo borotiin ah iyo dhiig kar sare (sida caadiga ah 90mmHg cabirka ah ee himogolobiin ah - namabarka hoose) waxaa dhici karta inaad qabtid cudurka loo yaqaan pre-eclampsia waxaadna u baahan doontaa daryeel gaar ah laga bilaabo markaas. Waxaa dhici karta in lagu weydiyo inaad kaadi keentid ilaa muddo 24 saacadood gudahood ah, si loo qiyaaso inta borotiinta dhabta ah ee aad qabtid. Borotiinta ku jirta kaadidaadu looma maleyn karo inay tahay calaamad muujinaysa inaad qabto jeermis, gaar ahaan haddii aadan lahayn calaamado kale.

### Kasoo qaadista kaadida ee guriga

Waxaa lagu weydiinaya inaad kaadidaada tijaabo kala timaadid guriga isla markaana keentid shaybaarka si loo baadho. Waxaa lagu siinayaa weel u gaar ah kaadida ama adiguba aad la timaadid, weelku noocuu doono ha ahaadee hubso inaad nadiifiso isla markaana si fiican loo tirtiro.

Waxaa jira saddex nooc oo tijaabooyin oo lagu weydiinayo inaad keentid.

Waa kuwaan sida loo sameeyaa:

#### 1. Subaxa hore kaadida ah

Maalinta aad ballanta leedahay, soo qaad qaar kamid ah kaadida kuugu horreysa ee aad subixii kaadiso markaad toostid.

## 2. 24-saacadood kaadida ah

Soo qaad oo Wada keen dhammaan kaadida aad kaadiso 24ka saac muddada ah

**Tallaabada 1aad** kadib markaad toostid, firaaqee kaadi haystaada macnuhu waa ku dhammee kaadida suuliga adigoon soo qaadin tijaabo. Umulisadaada ama dhakhtarkaaga ayaa laga yaabaa inay ku faraan inaad taas sameysid xilli go'an oo subaxdii ah.

**Tallaabada 2aad** soo qaad dhammaan kaadidii aad dhigta intii kaaga hartay maalintaas iyo habeynkeeda. Firaaqee weelka kaadida waqti kasta oo aad ku shubaysid weelka weyn ee shaybaarku ku siiyay.

**Tallaabada 3aad** sida saxda ah 24-saacadood kadib Tallaabada 1aad, soo qaad tijaabada kaadida ah ee kuugu dambaysay isla markaana kudar weelka weyn.

## 3. Hab socodka kaadida (MSU)

Nadiifi marinnada kaadida kuna nadiifi biyo.

Kadib markaas isticmaal '3da BJT' Qorshaha ah sida soo socota:

**Biloow** - ku kaadi wax xoogaa yar oo kaadi ah musqushas

**Jooji** - Inta ay weli kugu hartay kaadi badan oo aad dhigaysid

**Tijaabo** - mar labaad biloow isla markaana buuxi weelka

Kadibna kaadidii kugu hartay ku dhameyso musqusha.

Haddii aad ilowdo keenista tijaabada kaadida ah shaybaarka, weydiiso weel isla markaana keen mid cusub inta aad halkaas joogtid.

Wixii talo bixin ah ama macluumaad ku saabsan cudurka loo yaqaan pre-eclampsia, ee dumarka uurka leh ku dhaca wac hay'adda loo yaqaan the Action on Pre-eclampsia khadkeeda caawinta taleefanka ah 0208 427 4217

Action on Pre-eclampsia  
84-88 Pinner Road  
Harrow  
Middlesex  
HA1 4HZ

Email: [info@apex.org.uk](mailto:info@apex.org.uk)

[www.apex.org.uk](http://www.apex.org.uk)

Registered Charity No: 1013557  
Registered Company No: 2736320